



ismaamulka san diego



Biyo firdiyaha



Aaga ay ku dhacayaab biyaha



minjaroorka iyo biyaha firdha

Aagaga biyo Firdhintu waa qayb kamid ah Farsamooyinka ugu fiican ee Maamulka Naqshada Goobta ee Wayn (SSD-BMP) ee loo adeegsado maaraynta biyaha daadka. Aaga biyo firdhintu ayaa lagu rakibaa dhismeyaal gaar ah oo ku yaala Ismaamulka si ay gacan uga gaystaan **yaraynta cadadka biyaha daadka loogana hortago maadooyinka sunta ah** sida qashinka, daawooyinka bacriminta beeraha, sunta cayayaanka, iyo qaruuraxa soo gala marinnada biyaha daadka roobka kadibna galaaya baliyadda, wabiyada, iyo badwaynta deegaankeena. Gurigaaga waa mid kamid ah noocyada kaladuwan ee ku yaala Ismaamulkeena oo leh ugu yaraan hal Aaga Biyo Firdhintu.

Aagag Firdhintu Waxay Nadiifiyaan Marinnada Biyaheena


Aagaga Firdhintu ee dhismahaaga ayaa loo sameeyay inay yareeyaan ayna hoos u dhigaan cadadka biyaha daadka ee galaaya nidaamka qaada biyaha daadka. Aagaga Firdhintu ayaa sidoo kale gacan ka gaysta ka bixinta qashinka kusoo urura dhismahaaga kahor intaan biyuhu gaarin nidaamka biyaha Daadka Qaada. Maadaama aad tahay mulkiilaha mid kamid ah dhismeyaashaan leh Nidaamka Biyo Firdhintu, Ismaamulka ayaa kaa doonaaya inaad ka qaybgasho adoo **inaad samaynaaya kormeer joogto ah iyo talaaboooyinka dayactirka** si loo hubiyo in Aagaga Biyo Firdhintu si sax ah u shaqaynayaan.

Diiwaanadeena ayaa muujinaaya inaad haysato ugu yaraan hal 
Aaga Biyo Firdhintu ee dhismahaaga. Si ay kaaga caawiso joogtaynta aaggaan caagan **Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha ee ismaamulka San Diego** ayaa ku siinaaya buugaan xogta si looga jawaabo su'aalaha aad ka qabi karto BMP-yada iyo sida aad u joogtaynayo.

Sida Aagaaga Firdhintu U shaqeeyo

Aagaga Firdhintu waa aag geedo lagu beeray oo loo sameeyay inuu qabto biyaha daadka roobka ee ka yimaada meelaha dagaandega ah sida saqafyada, meelaha la maro, iyo wadooyinka. Biyaha daadka ayaa lagasoo duwaa meelahaan ayadoo la adeegsanaayo minjaroorka nidaamka biyaha soo aruursha, ama af biyaha shuba (arag sawirrka 1 ee ku yaala dhabarka





ismaamulka san diego

aaga firdhinta

danbe), kaasoo biyaha daadka roobka geeya Aaga Firdhinta. Aagga Firdhinta, biyaha daadka ayaa mara aaga beeraha leh iyo ciid loo yaqaano miireyaasha. Inta miiristu socoto, biyaha qulqulaaya ayaa la miiraa si looga hortago in wasaqdu gasho biyaha daadka. Miirista ayaa sidoo kale yaraysa xajmiga biyaha daadka ee galaaya nidaamka biyaha daadka taasoo ka hortagaysa fatahaad.

Hel oo Ilaali Aagagaaga Biyo Firdhinta



Si aad u hesho Aagaaga Biyo Firdhinta, raadi aag geedo ku

beeran yihiiin (tusaale, cawska ama geedaha) kuwaasoo caadiyan ah kuwo siman lahaanna kara dhul xoogaa taag ah. Aagaga Firdhinta ayaa ku ooli kara meelaha u dhow marinada gaariyaasha, aaga lagu lugeeyo, ama aasaaska gurigaaga. Raadi ilinka aaga Biyo Firdhinta ee biyaha daadku kasoo baxaan saqafka kore soona raacaan minjaroorka oo leh meelo ka hortagaaya daad raaca ama fidiyaha.

Marka aad hesho Aagaaga Biyo Firdhinta, waa muhiim inaad joogtayso. Ku haynta Aaga Biyo Firdhinta xaalad shaqaynaysa ayaa kaa caawinaysa inaan ilaalino nadaafada marinada biyaha ee

deegaankeena. Hoos waxaad ka helaysaa dhawr kamid ah shaqooyinka dayactirka ee u baahan in la sameeyo:

- Jar oo sin sida ku haboon si aad uga hortagto in geedu xad dhaaf u baxaan.
- Jar geedaha dhintay oo dib u beer geedaha.
- Haddii biyaha fadhiya sii fadhiyaan wax ka badan 24 saac kadib marka roobku da'ay, ku firdhi biyaha fadhiya aagaga taaga ee kuu dhow.
- Xaqiji in aaga biyo firdhantu uu helaayo cadadka saxda ah ee biyaha si loo beeraha caafimaadka qaba.
- Jilci oo badel ciida isku dhagtay si aad u kobciso beeraha caafimaadka qaba iyo miirista.
- Xaqiji in minjaroorada iyo biyo celiyaasha saqafku ay ku fuuraraan aagaga geedaha lagu beeray.
- Xaqiji in biyo celiyaasha, biyo firdhiyaasha, ama biyo tartiibiyaasha aan la bixin ama la xanibin.

Si aad u hesho liiska shaqooyinka kale, ka fiiri qorsheyaasha dayactirka ee ka yimaada ee shirkada dhistay gurigaaga.


Haddii aad qabto su'aalo, Nagalasoo Xariir: Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha

1-858-495-5323

BMP.Program@sdcounty.ca.gov
www.sandiegocounty.gov/stormwater

SAWIRKA 1

Aaga Biyo Firdhinta (Muuqaalka Dusha Sare)



Ku fashilmida
shaqooyinka lagu
taliyay ee dayactirka
ayaa keeni karta in
Aaga Biyo Firdhinta
fashilmo kadibna la
bilaabo baaritaan.

waad ku mahadsan
tahay samaynta
qaybtaada si
loo ilaaliyo
marinadeena biyaha

